

# Wax-ka-beddelis ku-meelgaar ah oo lagu sameeyay tillaabooyinka heerka A

Tillaabada heerka A, oo ah tillaabada heerka gobol ee ugu adag, waxay caadiyan tahay in ay socoto labo ilaa saddex toddobaad. 20 degmo oo Viken ku yaalla ayaa tillaabada ku jiriya muddo intaas aad uga dheer. Si arrintaas wax looga qabto ayay dawladdu Agaasinka caafimaadka iyo FHI ka codsatay in tillaabada heerka A is-beddelo ku-meelgaar ah lagu sameeyo. Waxay dawladda hadda oggolaanaysaa in dad badan tegi karaan jaamacadaha, machadyada iyo dugsiyada farsamada haddii si joogto ah loo baaro. Dukaammada ubaxa ee bedkoodu ka yar yahay 250 mitir oo laba jibbaaran way furnaan karaan. Is-beddelladaan waxay dhaqangelayaan laga billaabo saqda dhexe 16-ka abriil.

- Tillaabada heerka A markii la soo rogayay ujeeddadu ma ahayn in ay muddo sidaas u dheer socoto. Dhowaan markii la sii dheereeyay muddada ay tillaabada heerka A ku sii jirayaan 20 degmo oo Viken ku yaalla ayaa waxay keenaysaa dadka halkaas ku nool in ay ku dhowaad lix toddobaad oo kale weli ku sii jiraan tillaabo heerkeedu sidaa u adag yahay. Wax-ka-beddelladaan ku-meelgaar ah ee lagu sameeyay tillaabada heerka A ayaa la filayaa in ay xoogaa yareeyaan waxyeellada tillaabooyinka, ayuu yiri Bent Høie oo ah wasiirka caafimaadka- iyo daryeelka.

Degmooyinka ku jira tillaabada heerka A ardayda way ka xirnaayeen golayaasha jaamacadaha, machadyada iyo dugsiyada farsamada. Laga billaabo 16-ka abriil golayaasha waxbarashada sare way furnaan karaan marka aysan ardaydu golayaasha uga maarmin in ay tijaabooyin fuliyaan ama tababbar ku qaataan kuwaas oo aan loo qaban karin hab dhigitaal ah, ayna muhiim u tahay si uusan

waxbarashadooda dib u dhac ugu imaannin - ardaydana si joogta ah looga baaro covid-19 sida ay ku taliyaan mas'uuliyiinta ka-hortagga faafidda cudurka ee degmada.

Maktabadaha iyo hoolasha wax akhriska ayaa iyagana u furnaan kara ardayda sida joogtada ah looga baaro covid-19.

Dukaammada ubaxa ee ku yaalla degmooyinka ku jira tillaabada heerka A way furnaan karaan haddii goobta uu wax ku iibiyo aysan ka weynayn 250 mitir oo laba jibbaaran, waxa uu iibiyana ay u badan yihiin ubax cimrigiisu aad u gaaban yahay.

Waxaa sidoo kale talaadadii 13-kii abriil la ogaaday in labo wax laga beddelay tillaabooyinka heerka A ee khuseeya ciyaaraha sare: Laga billaabo talaado 13-ka abriil, saacadda 16 waxaa ciyaartoyda ciyaaraha heerka sare loo oggol yahay tababar abaabulan. Labada heer ee ugu sarreeya kubbadda cagtana waxaa loo oggol yahay ciyaaro tababar ah, taas oo dhaqangelaysa saqda dhexe 16-ka abriil. Ciyaarahan tababbarka ah waxaa joogi kara keliya ciyaartoyda, kaaliyayaasha iyo garsoorayaasha.

## **Dib ayaa loo eegayaa saddexda tillaabo ee heer gobol**

Agaasinka caafimaadka iyo Machadka caafimaadka dadweynuhu halkooda ayay ka sii wadayaan hawshii loo diray ee ahayd in ay dulmar guud iyo wax-ka-beddelis ku sameeyaan dhammaan saddexda tillaabo ee heer gobol (tillaabada heerka A, B iyo C).

- Tillaabada heerka A waa mid ku adag dadweynaha ku hoos jira. Laakiin tillaabada waxaa loogu baahan yahay in marka cudurku meel ka dillaaca si degdeg ah oo waxtar leh muddo gaaban gudaheed loogu joojiyo. Agaasinka caafimaadka iyo Machadka caafimaadka dadweynaha ayaa hadda eegaya in tillaabooyinka heerka B iyo C in inta hadda ka badan laga dhigi karo kuwo loo adeegsan karo meelaha muddo dheer u baahan tillaabooyin adag. Hadafku waa in culayska laga dhimo dadka meelahaas ku nool, ayuu yiri Høie.

## **Wax-ka-beddel lagu sameeyay tillaabooyinka heerka qaran – tababarashada dibedda**

Agaasinka caafimaadka iyo Machadka caafimaadka dadweynaha ayaa soo jeediyey in la soo rogo talo ah in ay ugu badnaan 20 qof ka qaybqaadan karaan firfircoonida abaabulan ee dibedda ka dhacda looguna tala galay dadka waaweyn. Dawladdu taas way taageertay. Taladu waxay dhaqangelaysaa saqda dhexe 16-ka abriil, ayada oo la dhaqangelaysa is-beddellada kale ee lagu sameeyay tillaabooyinka heer qaran.

Waxaa lagu talinayaa:

- Dadka waaweyn ayagoo ah kooxo ilaa iyo 20 qof ah ayay samayn karaan firfircooni abaabulan oo dibedda ka dhacda ilaa iyo inta ay isu jiraan masaafodhan ugu yaraan 1 mitir.